



Kumaan la xiriiraa haddii aan qabo walaacyo ku saabsan kiiskayga oo uusan xallin karin shaqaalaha kiiskayga ee FVS?

Haddii aad qabto cabasho ama walaac ku saabsan sida kiiskaaga loo maamulay, wac kormeeraha shaqaalaha kiiskaaga ee FVS. Haddii walaacaaga aan weli wax laga qaban, waxaad waci kartaa Maamulaha Degaanka.

- o Waxaad sidoo kale ka waci kartaa Xafiiska Xiriirrada Degaanka Doorasho 800-723-4831 ama 360-902-8060 si aad waqti kasta u hesho caawimo, ama waxaad ka waci kartaa Xafiiska Gardoonka/Ilaaliyaha Dadweynaha ee Xafiiska Qoyska iyo Carruurta 800-571-7321.

Xafiiska Gardoonka/Ilaaliyaha Dadweynaha waxaa uu qabtaa walaacyo iyo cabashooyinka ku saabsan waxqabadyada Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska. Waxaa ay awood u leeyihiin in ay baaraan waalacyada.

Adeegyada Mutadwacnimada Qoyska

Ilaalinta Badbaadada Carruurta Iyadoo La Xoojinayo Qoysaska



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Waa maxay Adeegyada Mutadwacnimada Qoyska (FVS)?

FVS waa barnaamij u oggolaanaya waalidiinta in ay doortaan ka-qaybgalka adeegyada si ay u daboolaan baahiyada carruurtooda ee ladnaanta, caafimaadka, iyo badbaadada.

Yoolka FVS waa in laga dhigo carruurta kuwo bedqaba iyo in la daboolo baahiyadooda iyadoo la xoojinayo oo la isku haynayo qoyska. Waqti kasta ayaa waxaad dooran karaa in aad joojiso la shaqeynta FVS. Haddii aad doorato in aad joojiso adeegyada FVS, Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) ayaa waxaa ay ka-dib qiimeyn doontaa heerka badbaadada iyo khatarta waxaa ayna go'aan ka gaari doontaa haddii ay xirayso kiiska ama ay xareyn doonto codsi ku tiirsanaan.



Waxa laga filan karo shaqaalaha kiiskaaga ee FVS

- Si ay ula macaamisho adiga iyo carruurtaadaba si ixtiraam leh.
- Si ay kuula shaqeyso oo ay u sameyso qorshe ka dhigaya carruurtaada kuwo bedqaba iyo si ay u xaqiijiso carruurtaada in ay haystaan waxa ay u baahan yihiin.
- In ay bixiso adeeyo adiga iyo qoyskaaga u gaar ah.
- In ay si gaar ah ugula kulanto carruurta gurigaaga hal ama laba jeer bishii.
- In ay gurigaaga kugula kulanto ugu yaraan hal jeer bishii, la sii sheego ama aan la sii sheegin, si ay kaagala hadasho horumarka iyo caqabadaha.
- In ay la xiriirto adeeg bixiyayaasha, la-hawlgalayaasha bulshada, qoyska iyo saaxiibada (iyadoo oggolaansho kaa haysato) si ay uga hesho aragtida bannaanka ee laga aaminsan yahay horumarkaaga iyo kan qoyskaaga.
- Si ay kaala hadasho tacadiyadda qoyska iyo cunsurrada kale ee halista ah ee qoyskaaga.
- In ay ku barto badbaadada carruurta yaryar haddii ay khuseyso.
- Haddii cunugaaga laga shakiyo in ganacsi ahaan galmo looga faa'iidaystay, si loogu sameeyo qiimeyn oo loo bixiyo adeeyo caawin doono.

Waxa shaqaalaha kiiskaaga ee FVS uu kaa filayo

- In aad ka qaybgasho geeddi-socodka qiimeynta iyo in aad gacan ka geysato sameynta qorshe lagu badbaadinayo carruurtaada.
- In aad raacdo qorshaha badbaadada (haddii aad mid leedahay).
- In aad ka qaybgasho adeegyada si aad ugu dhigto carruurtaada kuwo bedqaba iyo in la yareeyo halisaha xadgudubka ama dayaca.
- In aad u oggolaato shaqaalaha kiiska FVS in uu si gaar ah ula kulmo carruurtaada.
- In aad si joogto ah ula kulanto shaqaalaha kiiska ee FVS.
- In aad ku wargeliso shaqaalaha kiiska FVS isbeddelo kasta oo ku yimaada xaaladaada.
- In aad u saxiixdo adiga iyo carruurtaadaba siideynta macluumaadka.
- Si xushmad leh in aad u habsato in shaqaalaha kiiska uu fahmo xaaladda, baahiyada, iyo duruufaha qoyskaaga.



Sidee ayay FVS u shaqeeyaan?

FVS ayaa la bixin karaa haddii DCYF ay ka baarayso qoyskaaga eedaymaha xadgudubka carruurta, dayacaad ama hab-dhaqannada halista sare leh iyo:

- Haddii uu jiro walaac laga qabo xadgudub mustaqbalka ah ama dayacaad AMA
- Haddii ay hadda jiraan walaacyo laga qabo badbaadada carruurtaada.

Qoysaska ayaa sidoo kale wayddiisan kara adeegyada FVS waqtiyada ay baahida jirto iyaga oo wacaya DCYF.